# Isticmaalida **kalkulaytarisku** waxay ilmahaaga ka caawimi karaan tirabarshada.

## Isticmaalida kalkulaytorka si loo tiriyo kuwaas oo leh godadka jabjab xisaabaadka

Si aad u tiriso tira  ah .05 oo la isku sii dardaray riix

| 0 | . | 5 | + | = | = |
|---|---|---|---|---|---|

Si aad u tiriso .05 riix

| 0 | . | 0 | 5 | + | = | = |
|---|---|---|---|---|---|---|

*Fadlan ogsoonow kalkulaytoriska waaweyn qaarkood in laga yaabo inay u shaqeeyaan si sidaan ka duwan.*

Ku fiiri ilmahaaga midaan weydiina inuu joojiyo oo maleeyo nambrka soo socda. Hubi si aad u hesho.

Ku dhiirigeli ilmahaagu inuu tiriyo inta ugu badan oo uu samayn karo.

weydii ilmahaaga inuu sheego nambarada markay ka muuqdaan shaashada. Carruurta qaarkeed ayaa ku faraxsan inay ku qoraan nambarada warqad laynkeeda dheer waxayna raadiyaan astaamaha.

## Isticmaalida kalkulaytarka si loogu cayaaro cayaar (games)

**Kulaabo eber:** carruurtaadu ha qorto nambar la mid ah 349.65 weydiina waxay u baahan yihiin inay sameeyaan si ay u bedelaan 349.05 hal dhaqaaq keliya. (Waxay u baahan yihiin inay ogaadaan in 6da ku jirta 349.65 ay u taagan tahay lix tobnaad ama .06 dabadeedna ka jar .06 si aad u hesho 349.05). Waxaad wadaagi kartaan qabashada shaqada ilaa shaashadu muujiso 0.

## Isticmaalida kalkulaytarka si aad u soo saarto Intee?

Marka aad wax gadanayso ku dhiirigeli in ilmahaagu isticmaalo kalkulaytor si uu isugu daro 3 ama 4 shey. Weydii: *Natiijada kalkulaytarku ma sax bay u egtahay? Immisa doollar iyo sentis ayey ku fadhidaa.* Ka hadal isku darka kuwaas oo isku noqonaya $15.24. Weydii: *Immisa ayaad bixin doontaa?*



## Haddii aad jeclaan lahayd inaad ogaato intaas ka badan......

- La xiriir dugsiga agtaada ah ama la hadal ilmahaaga macalinkiisa
- Ka fiiri websaytka isticmaalna erayadaan waaweyn si aad u raadiso: numeracy, number sense, mathematical games, number, chance iyo data

Qoraalkaani wuxuu ku jiraa internetka websaytka:
www.dest.gov.au/schools/publications/indexhtm
iyo
www.gu.au/schoolscls/clearinghouse/

**Koobiya intaas ka badan oo qoraalkaana waxaa laga dalban karaa: The Clearinghouse for Literacy and Numeracy Research (Hayada Cilmibaarista Farbarashada iyo Tirabarashada) Tel: 07 3875 5703**

*Qoraalkaan waxaa kharajkiisa bixisay Dawlada Australia taas oo qayb ka ah ballanqaadkeeda wanaajinta natiijada tirabarashada dhamaan ardada.*

Australian Government
Department of Education, Science and Training

SANADAHA DAMBE EE DUGSIGA HOOSE

# Tirabarashada:

## Qoysaska wadajirka **uga wada shaqaynaya**

fursaduhu meel kasta waa ka jiraan




SOMALI / LATER PRIMARY YEARS

## Maxaan uga jeednaa **Tirabarshada**?

Carruurtu waxay yeeshaan xirfada tirabarashada markay u isticmaalaan fikrada xisaabaadka xaalladahooda maalmeed.

waxay bilaabaan inay macne ka sameeyaan xaalladahaan iyagoo weydiinaya su'aallahaan:




## Ma caawimi karaan **qoysasku**?

***Haa!***

Waxaa laga yaabaa inaad dareento in xisaabaadka lagu sameeyo dugsigu ka duwan yihiin sida laguu soo baray, ama xisaabtu aanay ahayn maadada aad ugu jeclayd. Waxaase laga yaabaa inaad ilmahaaga weli siyaabo badan u caawimi karto.

Macluumaadka soo socda ayaa kaa caawimi doona inaad carruurta ka caawinto barashada iyo jeclaanta isticmaalida fikradaha xisaabaadka waxqabadka maalmeed.

## Qoysasku way caawimi karaan iyagoo:

**Ka Jawaabaya fikradaha ilmahoodu....**

- iyagoo dhegaysanaya, kalana hadlayo wixii ku saabsan nambarka, qaabka iyo baaxada sheyga, masalan, cayaarta, dhismaha, sawirida, jabaqda iyo sheekooyinka
- iyagoo isticmaalaya fikradahooda, wax ka dhihidooda qorshaynta xafladaha iyo hawlmaalmeedka qoyska
- weydiinaya su'aallahaan oo kale:




**U tilmaamida...**

- sida nambaradaani nooga caawimaan inaan hello waxyaallo, in aan ogaano intay yihiin, inaan ogaano immisa iyo ogaanta midkuu yahay.

**Raadinta fursadaha meesha carruurtu awoodaan....**

- inay ka doortaan barnaamijya badan oo kumbuyuutar si ay u xaliyaan dhibaatooyinka una hellaan macluumaadka
- inay qabanqaabiyaan lacagtii ay bixin lahaayeen una qorsheeyaan munaasabado bulsho
- inay qayb ka qaataan xulashada iyo qabanqaabinta fiidiyo duubid iyagoo isticmaalaya jadwalka barnaamijka telefishanka

## Sidee **dugsiyada iyo qoysasku** u wada shaqayn karaan?

**La hadal** ilmahaaga macalinkiisa wixii ku saabsan tira ku barashada guriga iyo dugsiga lana socodsii wxiii dareen ah ee aad ka qabto iyaga.

**Weydii** macalinka sida aad uga caawimi karto barnaamijka xisaabta ee fasalka.

**Caawin** ilmahaaga si uu u jeclaado xisaabaadka ay ku sameeyaan dugsiga adoo is dhiirigelin ah ugaga hadlaya markay guriga keenaan.

**Kaalmee** Macalinka/dugsiga adoo tegaya fadhiga waalidka iyo adoo waqtigaaga ku tabarucaya ama kaalmaynaya.

**Raadi** sida xisaabaadku isu bedeleen intii ka dambaysa waqtigaagii dugsiga.

**Raadi** sida ilmahaagu ugu isticmaalo kalkulaytarka dugsiga.

**Imaw** habeenka waalidka ee loogu diyaargaroobayo ilmahaaga u gudbidiisa dugsiga sare.





# Liistada waxa la samaynayo

**Qoysasku waxay raadin karaan fursado ay ku tilmaamayaan kagana jawaabayaan fikrada tirabarashada ee carruurta. halkaan waxaa ku yaal masaalo:**

## Safarka:

Marka aad qorshaynayso inaad gaari ku safarto socod dheerilmahaaga ka qaybgeli inuu go'aanka wax ka sameeyo sida ugu fiican oo halkaas lagu tegi karo. Weydii: *Waa maxay wadada ugu dhowi? Immisa ayaad u malanaysaa inay qaadanayso?* Weydii inay isticmaalaan si ay kuu siiyaan jahooyin.

Marka ilmahaagu ku safrayo bas ama tareen u sheeg inay isticmaalaan jadwal si ay go'aan uga gaaraan midka la raacayo si waqtigii laga rabay ay u tagaan. Weydii: *Goorma ayaad guriga ku beegan tihiin? Baskee ayaad raacaysaan?* Weydii inta ay ku qaadanayso.

## Cayaaraha:

La hadal ilmahaaga wixii ku saabsan tirakoobka cayaaraha (games) iyo munaasabadaha. Weydii: *Yaa hogaaminaya xagga gool dhalinta? Waa maxay cayaaryahanka waqtigiisa ugu fiicani? Ku badin karaan waqtiga u haray? Waa sidee ixtimaalka uu roob ku di'i karaa marka fiinaalaha la cayaarayo?*

## Guriga iyo wax soo gadashada:

Marka wax laga duubayo telefishanka ka qaybgeli inay rakibaan duubida. Weydii: *Goorma ayaa barnaamijku bilaabanayaa? Immisa ayuu soconayaa cajladuse ma deeqaysaa?*

Marka ilmahaagu doonayo inuu wax ku gato lacagtiisa, ka caawin qorshaynta sida loo kaydsado.

Isticmaali waxyaallaha ka hadlaya alaabta la dhimay si aad uga hadasho sheeyada ay rabaan inay gataan. Weydii: *Qiimuhu intuu noqonayo ka dib marka wax laga dhimo? Kumaa riqiisaysan in la gato mid weyn ama laba yaryar? Kan yari qiimaha barkiis miyaa?*






# Liistada waxa la samaynayo

**Qoysasku waxay raadin karaan fursado ay ku tilmaamayaan kagana jawaabayaan fikrada tirabarashada ee carruurta. halkaan waxaa ku yaal masaalo:**

## Safarka:

Marka aad qorshaynayso inaad gaari ku safarto socod dheerilmahaaga ka qaybgeli inuu go'aanka wax ka sameeyo sida ugu fiican oo halkaas lagu tegi karo. Weydii: *Waa maxay wadada ugu dhowi? Immisa ayaad u malanaysaa inay qaadanayso?* Weydii inay isticmaalaan si ay kuu siiyaan jahooyin.

Marka ilmahaagu ku safrayo bas ama tareen u sheeg inay isticmaalaan jadwal si ay go'aan uga gaaraan midka la raacayo si waqtigii laga rabay ay u tagaan. Weydii: *Goorma ayaad guriga ku beegan tihiin? Baskee ayaad raacaysaan?* Weydii inta ay ku qaadanayso.

## Cayaaraha:

La hadal ilmahaaga wixii ku saabsan tirakoobka cayaaraha (games) iyo munaasabadaha. Weydii: *Yaa hogaaminaya xagga gool dhalinta? Waa maxay cayaaryahanka waqtigiisa ugu fiicani? Ku badin karaan waqtiga u haray? Waa sidee ixtimaalka uu roob ku di'i karaa marka fiinaalaha la cayaarayo?*

## Guriga iyo wax soo gadashada:

Marka wax laga duubayo telefishanka ka qaybgeli inay rakibaan duubida. Weydii: *Goorma ayaa barnaamijku bilaabanayaa? Immisa ayuu soconayaa cajladuse ma deeqaysaa?*

Marka ilmahaagu doonayo inuu wax ku gato lacagtiisa, ka caawin qorshaynta sida loo kaydsado.

Isticmaali waxyaallaha ka hadlaya alaabta la dhimay si aad uga hadasho sheeyada ay rabaan inay gataan. Weydii: *Qiimuhu intuu noqonayo ka dib marka wax laga dhimo? Kumaa riqiisaysan in la gato mid weyn ama laba yaryar? Kan yari qiimaha barkiis miyaa?*







# Liistada waxa la samaynayo

**Qoysasku waxay raadin karaan fursado ay ku tilmaamayaan kagana jawaabayaan fikrada tirabarashada ee carruurta. halkaan waxaa ku yaal masaalo:**

## Safarka:

Marka aad qorshaynayso inaad gaari ku safarto socod dheerilmahaaga ka qaybgeli inuu go'aanka wax ka sameeyo sida ugu fiican oo halkaas lagu tegi karo. Weydii: *Waa maxay wadada ugu dhowi? Immisa ayaad u malanaysaa inay qaadanayso?* Weydii inay isticmaalaan si ay kuu siiyaan jahooyin.

Marka ilmahaagu ku safrayo bas ama tareen u sheeg inay isticmaalaan jadwal si ay go'aan uga gaaraan midka la raacayo si waqtigii laga rabay ay u tagaan. Weydii: *Goorma ayaad guriga ku beegan tihiin? Baskee ayaad raacaysaan?* Weydii inta ay ku qaadanayso.

## Cayaaraha:

La hadal ilmahaaga wixii ku saabsan tirakoobka cayaaraha (games) iyo munaasabadaha. Weydii: *Yaa hogaaminaya xagga gool dhalinta? Waa maxay cayaaryahanka waqtigiisa ugu fiicani? Ku badin karaan waqtiga u haray? Waa sidee ixtimaalka uu roob ku di'i karaa marka fiinaalaha la cayaarayo?*

## Guriga iyo wax soo gadashada:

Marka wax laga duubayo telefishanka ka qaybgeli inay rakibaan duubida. Weydii: *Goorma ayaa barnaamijku bilaabanayaa? Immisa ayuu soconayaa cajladuse ma deeqaysaa?*

Marka ilmahaagu doonayo inuu wax ku gato lacagtiisa, ka caawin qorshaynta sida loo kaydsado.

Isticmaali waxyaallaha ka hadlaya alaabta la dhimay si aad uga hadasho sheeyada ay rabaan inay gataan. Weydii: *Qiimuhu intuu noqonayo ka dib marka wax laga dhimo? Kumaa riqiisaysan in la gato mid weyn ama laba yaryar? Kan yari qiimaha barkiis miyaa?*





## Liistada waxa la samaynayo

Ku dhiirigeli ilmahaaga inay ku weydiiyaan su'aallo si ay uga caawinto dareenka xaalladahooda maalmeed?

Immisaa ayaa halkaa taal?

Ma ku filnaan doontaa?

Intee weynaan le'egtahay?

Xaggee aadi doonaa?

Maxaa dhacaya Haddii?

Ma u badan tahay inay dhacdo?

Ma le'eg tahay?

Sidee ku ogaanaysaa in?

Haddii aad si kale u qabato isla jawaabtii ma hellaysaa?

Waa immisa?




## Liistada waxa la samaynayo

Ku dhiirigeli ilmahaaga inay ku weydiiyaan su'aallo si ay uga caawinto dareenka xaalladahooda maalmeed?

Immisaa ayaa halkaa taal?

Ma ku filnaan doontaa?

Intee weynaan le'egtahay?

Xaggee aadi doonaa?

Maxaa dhacaya Haddii?

Ma u badan tahay inay dhacdo?

Ma le'eg tahay?

Sidee ku ogaanaysaa in?

Haddii aad si kale u qabato isla jawaabtii ma hellaysaa?

Waa immisa?





## Liistada waxa la samaynayo

Ku dhiirigeli ilmahaaga inay ku weydiiyaan su'aallo si ay uga caawinto dareenka xaalladahooda maalmeed?

Immisaa ayaa halkaa taal?

Ma ku filnaan doontaa?

Intee weynaan le'egtahay?

Xaggee aadi doonaa?

Maxaa dhacaya Haddii?

Ma u badan tahay inay dhacdo?

Ma le'eg tahay?

Sidee ku ogaanaysaa in?

Haddii aad si kale u qabato isla jawaabtii ma hellaysaa?

Waa immisa?


